



## (Aduunyadu waa raaxo, raaxada aduuna waxaa u khayr badan gabar saalixad ah

Cabdulaahi Binu Camar Allaha ka raali ahaado isagiyo aabihiibe wuxuu ka wariyey Rasuulka Ilaahay scw inuu yiri: (Aduunyadu waa raaxo, raaxada aduuna waxaa u khayr badan gabar saalixad ah.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu scw wuxuu sheegay in aduunyada iyo waxa dhex yaalaba ay yihiin wax waqti kooban lagu raaxaysto, ka dibna tagaya, raaxada aduun waxaa ugu fiican xaas saalixad ah, taasoo markuu ninkeedu eego farxad gelisa, markuu wax farana adeecda, markuu ka maqnaadana nafteeda iyo maalkiisaba ilaalisa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/5794>

النجاة الخيرية  
ALNAJAT CHARITY

